

Shatiga wadista ee Da'yarta.



Da'yarta:

Da'yartu waxay leeyihiin sharuuc u gaar ah si ay gaari u wadaan. Si ay u helaan Ogolaansho Rasmi ah da'yartu waa in ay buuxiyaan sharuudaha soo socda:

- Waa In ay jiraan (15 1/2) ama (18) sano
- Waa in ay tagaan xafiiska DMV. (ka sameyso balan si ay u dadajiyaan shaqda ay kuu qabanayaan.
- Waan in aad buuxisaa arjiga DL 44.
- Waalidkooda ama cida mas'uulka ka ah ha saxiixaan arjiga dalabka wadida DL 44.
- Waa in aad suulka saarto
- Waa in sawir lagaa qaado.
- Waa in aad siiso soshal sakuurati lambarkaaga.
- Waa in aad haystaan caddeyn da'dooda muujinaysa iyo sharciyada aad ku joogto.
- Waa in aad sii saa magacaaga runta ah oo sadexan.
- Waa in dhiibtaa foomamka shatiga wadida fasalada waxbarashada iyo tababarka.
- Waa in aad bixisaa \$26 ee khidmada ah.
- Waa in aad baasto imtixaanka idhaha.
- Waa in aad ku guulaysat imtixaanka shirciyada wadada iyo calaamadaha. Imtixaanku wuxu ka koobanyahay 46 su'aalood. Waxad haysataa sadex fursadood in aad ku guulaysato. Hadii aad ku dhacdo waa in aad sugtaa 7 bari intaanad imtixaanka galin mar kale.

Faahfaahin dheraad aht:

- Hadii aad ka wayntahay 17 1/2 laakiin aad ka yartahay 18 jir, waxa laga yaabaa in aad hesho ogolaansha iyadoon lagugu xidhin in aad ka qayb gasho waxbarashada wadida baabuurta ama aad la timaado shahadada tababarka. Si kastaba ha ahaatee ma gali katid imtixaanka wadooyinka ilaa aad gaadho 18.
- Marka aad ku baastid imtixaanka qoraalka ah waxa lagu siinayaa ogolaansha ku meel gaarka ah.
- Wa lidka, cida mas'uulka ka ah,, ninka ama xaaska ama qof 25 jir ah ama ka weyn, oo hayst shatiga wadida ee California oo aan dhicin waa in uu kula socdaa mar walba oo aad gaadhi kaxayneyso. Isaga ama iyadu waa in ay agtaada fadhiyaan si ay u xukumaan gaadhiga, ha dii ay khasab noqoto. Waa sharci daro in aad kaligaa gaadhi kaxayso marnaba.
- In taadan xaq u yeelan in aad imtixaanka gasho waa in aad:
 - Ugu yaraan jiraa 16 sano
 - Haystaa Ruqsada barashada waddida ugu yaraan (6) bilood
 - Dhameystay Fasalka Gaari waddida ee Laga Rabay
 - Dhameystay lix saacadood oo tababar ah oo uu ku seeyey qof xirfad u leh wadida.
 - Waa in aad dhamaysatay 50 saacadood oo tababar ah oo uu ku siiyey qof 25 jir ah am ka weyn. Qofka weyn ee tababarka ku siinaya waa in uu haystaa shatiga wadista California oo aan dhicin. Waa in uu ku siiyo shahaadada cadayneysa tababarka 50 saacadooda ah. 50k saacadood 10 ka mid ah waa in aad habiinkii qaadataa.
 - Waxa lagu waydiinn doonaa in aad tusto caymis sax ah intaanad imtixaanka gelin, ha aadan haysan imtixaanka dib baa loodhigayaa.
- Marka aad baasto imtixaanka wadista waxa lagu siin doonaa shatiga wadista oo ku meelgaar

ah 60 cisho, ilaa uu kaaga yimaado shatiga wadida oo sawirkaagu ku dheganyaha, kaas oo boostada laguugu soo rididoono

- Hadii aad imtixaanka ku dhacdo waa in aad sugtaa laba asbuuc inta aanad galin mar kale. Waxa aad haysataa sadex fursadood in aad ku baasto.

Kala xidhiidh DMV:

San Diego Office:

Address: 3960 Normal St., San Diego, 92103

Phone: (800) 777-0133

Website: <http://www.dmv.ca.gov>

San Diego Clairemont Office:

Address: 4375 Derrick Dr., San Diego, 92117

Phone: (800) 777-0133

Website: <http://www.dmv.ca.gov>

El Cajon Office:

Address: 1450 Graves Ave., El Cajon, 92021

Phone: (800) 777-0133

Website: <http://www.dmv.ca.gov>

Chula Vista Office

Address: 30 N. Glover Ave., Chula Vista, 91910

Phone: (800) 777-0133

Website: <http://www.dmv.ca.gov>